

Su'aalaha Badanaa Leys Weydiiyo ee ku Saabsan Jadeecada

Maxay tahay jadeecada?

Jadeecada aad ayaa leysugu daartaa (loo kala qaadaa) waxayna sababi kartaa jirro halis ah. Jadeecada waxaa keena firus waxayna u faaftaa si fudud marka qofka qaba cudurka uu neefsado, qufaco ama hindhiso. Jadeecada waxay u faaftaa si fudud oo qofkasta oo ku dhawaada qof qaba cudurka ama aan qabin difaac (haysashada difaaca waa inaad qaadatay talaalka ama horay kuugu dhacday jadeecadu), waxay u badan tahay in qofka uu qaado cudurka.

Maxay yahiin calaamadaha lagu yaqaan jadeecada?

- Qandho
- Duuf
- Qufac
- Indho caseeye (indho gaduudan, ay biyo ka socdaan)
- Nabraha yaryar ee ka soo baxa korka oo idil

Dadka waxay faafin karaan jadeecada ka hor inta aysan muujinin calaamadaha. Calaamadaha waxay badanaa socdaan muddo 7-10 maalin.

Sidee looga hortagaa jadeecada?

Talaalka Jadeecada, Qaamoo Qashiirka, Rubella (Measles, Mumps, Rubella) (MMR) aad ayuu ammaan u yahay, si wanaagsan ayuu u shaqeyaa iyo wuxuu si wanaagsan uga hortaggaa jadeecada. Lobo qiyaas ka mid ah talaalka MMR waxay ka hortagaan jadeecada ku dhawaad 97%; hal qiyaas waxay waxtartaa ku dhawaad 93%.

Sidee loo daweyaa jadeecada?

Ma jirto daawo lagu daweyo jadeecada. Daawada laga iibsado farmashiyaha adigoo dhakhtar kuu qorin waxay kaalmo ka geysan kartaa yaryenta qandhada. Calaamadaha kale waxay badanaa ku baaba'aan 2-3 toddobaad gudahood.

Yaa ku jira halista jadeecada?

Qof kasta aan horay loo talaalin ama horay u qaadin jadeeco wuxuu ku sugan yahay halis. Caruurta ka yar 12 bil waxay ku jiraan halis maxaa yeelay waxay ka yar yihiin da'dii talaalka ay qaadanayeen.



Yaa u baahan talaalka jadeecada (MMR)?

Caruurta - Caruurta waa in la siiyo labo qiyaas oo ah talaalka MMR, laga bilaabo qiyaasta kowaad oo la siiyo cunugga marka uu gaaro 12-15 bilood kaddibna waxaa la siiyaa qiyaasta labaad marka uu gaaro 4-6 sanno ama ugu yaraan 28 maalin kaddib marka la siiyo qiyaasta kowaad.

Ardayda dhigata xarumaha Waxbarashada Dugsiga Sare Kaddib (Post-High School Educational Institutions) - Ardayda dhigata xarumaha waxbarashada dugsiga sare, kuwa aan muujinin caddeyn in ay qaateen talaalka jadeecada waxay u baahan yahiin labo qiyaas oo ah talaalka MMR, qiyaasta labaadna waxaa la siiyo 28 maalin kaddib qiyaasta kowaad.

Qaangaarka - Dadka dhashay 1957 ama kaddib, aan haynin caddeyn in aysan qabin difaaca ka soo horjeeda jadeecada, waa in la siiyo ugu yaraan hal qiyaas oo ah talaalka MMR.

Musaafiriinta Caalamka - Dadka jira 6 bilood ama ka weyn ee u safri doona caalamka waa in laga ilaaliyo jadeecada.

Sidee ayaan u badbaadiyaa cunugeyga da'diisu ka yar tahay 12 bil?

Haddii waalidiinta ama bixiyeyaasha daryeelka aysan qaadanin talaalka MMR ama mar hore ku dhacin cudurka jadeecada, waa in la talaalo. Waxaa muhiim ah in la habsado in dadka ku wareegsan cunugaada cusub in aysan cunugaada u keenin jadeeco iyo cuduro kale (sida xiiqdheerta).

Maxaa dhaca haddii qof ka tirsan qoyskeyga uu qabo jadeeco ama ku dhawaaday qof qaba jadeeco?

Isla markiiba wac takhtarkaada, kalkaalinta ama kliinikada. Ka hor inta aadan tagin xafiiska bixiyaha daryeelka caafimaadka, wac si aad ugu sheegtid iyaga in adiga ama xubin ka tirsan qoyskaada uu qabo jadeeco. Ka fogow dadka kale ilaa ugu yaraan muddo afar maalin kaddib marka nabraha bilowdaan ama baarista caddeyso in aysan kugu dhicin jadeeco.

Su'aalaha Badanaa Leys Weydiyo ee ku Saabsan Jadeecada

Ma loo baahan yahay in dumarka xaamilada qaadato talaalka jadeecada (MMR)?

Xaamilada waa in aysan qaadatin talaalka MMR. Dumarka xaamilada ee u baahan talaalka waa in ay sugaan ilaa ay ka dhallaan kaddib. Dumarka waa in ay iska ilaaliyaan in ay noqdaan xaamilo muddo afar todobaad kaddib marka ay qaataan talaalka.

Talaalka Jadeecada ma yahay ammaan?

Cilmi baarista waxay muujisay in talaalka jadeecada (MMR) yahay ammaan iyo in uu si wanaagsan u shaqeeyo. In leys talaalo waa ka ammaan badan tahay in la qaado cudurada uu talaalka kaa daafaco.

Ma jiraan waxyeelo la socda talaalka?

Sida daawo kasta, talaalka jadeecada (MMR) wuxuu sabab u noqon karaa waxyeelo, kuwaasoo inta badan fudud:

- Xanuun ku yimaada meesha la duray
- Qandho
- Nabro yaryar
- Qanjirada daanka ama qoorta oo barara

Miyuu tallaalka MMR sababaa ootiisamka?

Talaalladu ma keenaan ootiisam. Dhab ahaantii, cilmi-baarisyo waxay muujiyeen inayn xiriir lahayn qaadashada tallaalka iyo qaadidda ootiisamka. Saynisyahanadu waxay si taxadar leh u darseen tallaalka MMR mana jiraan daraasado lagu ogaaday in xiriir ka dhexeeya ootiisamka iyo tallaalka MMR.

Weligey ma u baahan doonaa talaalka xoojinta?

Haddii aad qaadatay labo qiyaas oo ah talaalka MMR, ma u baahnid xoojiyaha. Haddii aadan hubin in lagu talaalay, la hadal bixiyahaada daryeelka caafimaadka.

Xaggee ayaan ka heli karaa talaalka jadeecada?

Bixiyahaada daryeelka caafimaadka

Columbus Public Health
(614) 645-8180

Franklin County Public Health
(614) 525-3719

Heart of Ohio Family Health Centers
(614) 235-5555

Lower Lights Christian Health Center
(614) 274-1455

Lutheran Social Services (Faith Mission Health Center)
(614) 224-6617

Nationwide Children's Hospital Primary Care Centers
(614) 722-6200

PrimaryOne Health Centers
(614) 645-5500

Southeast Healthcare Services
(614) 225-0990

Farmashiyaha tafaraaruqa ama kliinikada daryeelka xaafadda (tusaale Walmart, CVS, iwm.)

Xaggee ayaan ka heli karaa macluumaad badan oo ku saabsan jadeecada?

Ohio Department of Health
odh.ohio.gov/know-our-programs/Vaccine-Preventable-Diseases/resources/Measles

Centers for Disease Control and Prevention
cdc.gov/measles

La cusboonaysiiyay 3/2025